



yaroo, waxaan ku barayaa erayo, Ilaahay xifdi wuu ku xifdine, Ilaahey xifdi hortaadaad ka heliye, markaad wax waydiisanayso Ilaahay waydiiso, hadii aad cid kaalmaysan Ilaahay kaalmayso

Waxaa laga wariyey Ibnu Cabaas Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiibe wuxuu yiri: "Maalin ayaan Rasuulka scw gadaashiisa fuushanaa, wuxuu igu yiri: " " yaroo, waxaan ku barayaa erayo, Ilaahay xifdi wuu ku xifdine, Ilaahey xifdi hortaadaad ka heliye, markaad wax waydiisanayso Ilaahay waydiiso, hadii aad cid kaalmaysan Ilaahay kaalmayso, ogowna haday ummadda oo dhan isu tagaan si ay wax kuugu taran, kuma tari karaan wax Ilaahay kuu qoray mooyee, hadii dadka oo dhan isu tagaan si ay kuu dhibaan kuguma dhibi karaan, wax uu Ilaahay kuu qoray mooyee, kor ayaa loo qaaday qalimadii warqadihiina way qalaleen ".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi]

Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaade wuxuu sheegay in isagoo yar uu Nabiga scw la fuushanaa, markaasa Nabigu scw ku yiri: waxaan ku barayaa arimo iyo waxyaabo Ilaahay kugu anfidoon: Ilaahay xifdi, oo ku xifdi inaad ilaaliso wuxuu ku faray iyo inaad ka dheeraato wuxuu kaa reebay, waa inuusan kaa helin meelaha macsida iyo danbiga, hadaad sidaa samayso abaal marintaadu waxay noqonaysaa in Ilaahay kaa xifdiyo dhibka aduunka iyo kan aakhiroba, kuguna guuleeyo dhamaan waxaad rabto oo dhan halkaad u dhaqaaqdaba. Hadii aad rabto inaad shay waydiisato, ha waydiisan cid aan Ilaahay ahayn, waayo isaga kaligi ayaa ajiiba kuwa wax waydiista. Hadii aad damacdo in lagu kaalmeeyo cidaan Ilaahay ahayn ha kaashan. Waa inaad yaqiinsataa inaad helayn nafac hadii ay dadka dhulka jooga isu tagaan si ay wax kuu taraan kuguma tari karan wax Ilaahay kuu qoray mooyee. wax dhiba kuguma dhacayo hadii ay isu tagaan dadka dhulka jooga oo dhan si kuu dhibaan kuguma dhibi karaan wax Ilaahay kuu qoray mooyee. Arinkaan Ilaahay casa wajala ayaa qoray, wuxuuna ku qadaray sida xikmadiisa iyo cilmigiisu keenayaan, wax badalid ahna laguma samaynayo wax Ilaahay qoray.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

